

TALLAALKA

Qaado mudditaankaaga si aad caafimaad ugu joogto

Tallaaladu waa mudditaanka kaa caawiya in aanad bukoon


SABABTEE AYAAN UGU BAAHANAHAY TALLAALKA?

Dalka Maraykanka, cuduro badan oo ay dadku ku bukoon jireen mar hadda waa ay ka tageen. Mid ka mid ah sababaha ugu muhiimsan waa isticmaalka tallaalka. Tallaalka waxa uu caawiyaa in laga hortago cudurka loo gudbin karo qof ilaa qof kale. Markaad hesho mudditaanka aad u baahantahay, waxaad naftaada ka ilaalisa iyo kuwa aad jeceshahayba in ay bukoodaan.

SIDEE AYAY TALLAALKU U SHAQEYYAAN?

Tallaalka waxaa laga sameeyee fayras la mid ah (sidoo kale loogu yeedho jeermis) kaas oo sababa cudurka, jeermiska loo isticmaalo in laga sameeyo tallaalka mid uun wuu “dhintay” ama waa “daciif”. Kuma bukoon doontid, waxay ka caawin doontaa in jidhkaagu la dagaalamo jeermiska iyo cudurka ay sababaaan.

KUMAA U BAAHAN TALLAALKA?



MA JIRTA SAAMAYN TABBAN?

Dadka qaar waxay yeeshaan saamayn tabban oo yar ka dib markay qaataan mudditaankooda. Tani waxay ku tagtaa maalin ama labba.



Xanuun/Casaan



Finan Yar yar



Xumad Degen

Dadka qaar waxay leeyihiin mid dhif ah, oo saamayn tabban oo xun ah ka dib markay qaataan mudditaankooda. Wakhtiyada badankooda, waxay dhici doontaa dhowr miridh ama dhowr saacadood ka dib markay qaataan mudditaanka.



Adkaansho Neefsashada ah



Dareemaya Dawakh



Finan/Cun cun



Barar Hunguriga ah

TALLAALADEE AYAAN U BAAHANAHAY?

Shaxda dhinaca kale waxa ay muujinaysaa nooca mudditaanka dadka waa wayn iyo carruurto u baahantahay. Dadka waa way nee aan qaadan dhammaan mudditaanada markay carruur ahaayeen waxay u baahan doonaa mudditaan dheeraad ah. La hadal dhakhtarkaaga si aad u ogaato kuwa ay yihiin mudditaanka aad u baahantahay.

Magaca dhakhtarkayga:

Lambarka telefoonka dhakhtarkayga:

Macluumaadka dheeraadka ah, booqo: www.vaccines.gov

Qaado mudditaankaaga si aad caafimaad ugu joogto

Ka arag dhakhtarkaaga baadhitaankaaga oo ka hel mudditaano cusub ee aad u baahantahay.

Ka arag dhakhtarkaaga baadhitaankaaga oo ka hel mudditaano cusub ee aad u baahantahay:

(Magaca) _____ (Da'da) _____ (Taariikhda dhalashada)
 Booqashadaada xigtaa waa: _____ (gelinka hore/gelinka dambe)
 (Taariikhda) _____ (Wakhtiga)

Mudditaanka aad u baahantahay	Maxaa loogu yeedhaa?	Kumaa u baahan?			Cudurkee ayay mudditaanku caawiyaan ka hortagooda?	Cudurku muxuu sababaa?
		Carruurta* Keliya	Carruurta & Dadka waa wayn	Dadka waa wayn Keliya		
<input type="checkbox"/>	DTaP ama Td/Tdap		X		Gowracatada	Xumad, hunguri xanuun iyo qabow
					Teetanada	Xanuun muruqyada ah iyo neefsasho wakhti adah ah ama liqitaanka
					Kixda	Qufac daran iyo neefsasho wakhti adag, cunitaanka iyo cabbitaanka
<input type="checkbox"/>	Flu		X		Hargab	Cauqa sanko, hunguriga iyo sambabada
<input type="checkbox"/>	HepA		X		Jooniska A	Nooc cudurka beerka ah
<input type="checkbox"/>	HepB		X		Jooniska B	Nooc cudurka beerka ah
<input type="checkbox"/>	Hib		X		Bakteeriya keenta Cuduro badan	Caabuqa liidka ku wareegsan maskaxda iyo xangulaha
<input type="checkbox"/>	HPV		X		Kansarka qayba hoose ee ilma galeenka	Nooc kansarka haweenka ah
					Burooyinka xubnaha taranka	Nooc cudur ah oo lagu faafin karo galmadda
<input type="checkbox"/>	IPV	X			Dabaysha	Jidhka oo aan awood u lahayn in uu dhaqaaqo ama wakhiyada qaarkood xataa in la neefsado
<input type="checkbox"/>	MCV4		X		Mayningokokal	Cudurka liidka ku wareegsan maskaxda iyo xangulaha
<input type="checkbox"/>	MMR		X		Jadeeco	Xumad, finan, san duuf leh iyo qufac
					Qanjo barar	Xumad, madax xanuun iyo barar qaybta afka ee samaysa candhuufta
					Jadeeco Jarmal	Xumad, qanjo barar, iyo finan
<input type="checkbox"/>	PCV		X		Oof	Caabuqa sambabada
<input type="checkbox"/>	RV	X			Cudurka shubanka carruurta	Xumad, matag iyo shuban
<input type="checkbox"/>	Tallaalka hablabaasta				Habla baas	Finan cuncun leh oo jidhkoo dhan ah
<input type="checkbox"/>	Tallaalka finanka			X	Xanuun leh finanbadan	Finan xanuun leh oo dheecaan leh

* Da'da carruurta 0 ilaa 18

Ku ilaali adiga iyo kuwaad jeceshahayba caafimaad. Hel mudditaankaaga.